**Amar sharci lamb 31. Rep**

**Qodobada la xiriira waqtikordhinta heshiisyada kirada, ee barakacayaasha iyo kirada.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYANIGA EE SOMALIYA**
**MAAMULAHA GUUD**

Kadib markii la arkay sharciga lamb 12 ee 8 Febaraayo 1950

Kadib markii la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyada ee 31 Maarso 1950.

Kadib markii la garoowsaday baahida iyo deg-degta loo qabo in la habeeyo dhulalka ku yaala qeybaha magaalooyinka ah.

**WAXAA LA ARMRAY**

**Cutubka 1aad**

**Qod. 1**

Ijaarka hantida magurtada ha ee magaalad ku dhex yaala oo logu tala galay guri ama isticmaal kale, wuxuu xaq u yeelan doonaa kadib markii uu hirgalo amar-sharcigaan in loo dheereyo muddada ijaarka ilaa 31 Disembar 1950 haddii uusan muudada heshiiska ijaarka aysan ka horeynin taariikhdaasi.

Ijaarluhu wuxuu xaqaasi yeelan doona in lagu fuliyo ciddi ka ijaaratay, ama ciddii gadatay ama haddii lagu dhex jiro heshiis kala gadasho ah.

**Qod. 2**

Lama hirgelin karo ilaa iyo 31 Disember falalka la xirira in laga bixiyo hantida ma guurtada dadka deggen kadib markii laga reebo marxalada ku qoran qod. 3 iyo ee isla amarkaan.

**Qod. 3**

Haddii ijaarku uu khuseeyo guri degaan ah, ijaarluhu xaq uma yeelan doono haddii:

a) Haddii lagu leeyahay ijaarka ama uusan gudan wajiibaadkiisa;

b) Haddii hantiluhu muujiyo in baahi deg-deg oo rasmi ah jirto oo ku qasbeysa in uu ku soo guuro gurigaas;

c) Haddii ijaarluhu uu meel kale u guuray.

**Qod. 4**

Haddii hantida maguurtada aan loo istimaaleynin guri degaan ah, looma dheereyn karo muddada kirada haddii:

a) Ijaarka uusan bixin ama uusan gudan waajibaadkiisa;

b) Laga bedelay isticmaalkii loogu tala galay iyo howlihi lagu qaban jiray markii laga reebo in baahi jirto awgeed ijaarluhu uu ku qasbanaaday in laga dhigo hoy la dego.

**Qod. 5**

Xukunka ama amarka in laga baxo hantida maguurtada asbaab la xirirta baahida qofka ijaaray, waxay ku micna beeli doonta haddii hantidaas maguurtada ah cid kale ay haysato, ama la keeno maguurto kale oo aysan ahayn midda uu ijaarluhu haystay.

Haddii ijaarluhu uusan haysanin, kirestuhu sabab la’aan uu ka kireeyo cid kale amase uu ku wareego goob kale waxaa qasab ah dib loogu celiyo wixii kharaj ah ama dib loogu celiyo goobtii oo ijaartay, haddii uusan qof laga ijaaray aysan war u haynin in ijaar qalad la galiyey.

Kireeyaha, si qayaano ku jirto ku guleysto in dib loogugu soo celiyey goobta uu kireeyey isagoo sheeganaya in ay jirto baahi waxaa u muteysan doona ganax ilaa So 1,000.

**Qod. 6**

Garsooraha awooda u leh, kadib markii la dhegeysatay ijaarlaha, sida ugu dhaqsida badan iyadoo laga tegi doono qababka aan muhim ahay wuxuu suggi doona taarikhda la fulin doono xukunka ama amarka fassaxayo hantida ma guurtada, iyadoo lagu qori doono qeybta hoose ee dacwada la qaadi doono.

Muddada fulinta kama badnaan doono 10 beri maalinta dekreeta la soo saray, haddii fassaxidda hantida maagurtada ah ay sababtay fulin la’aanta wajiibaadka ijaarlaha. Marxaladaha kale Garsooruhu wuxuu ka baran degi falalka u gaar ah.

Xeerka lagu carifay qodobkaan ma laha rafcaan. Laakin haddii goaanku yahay in laga saaro, Garsooruhu wuxuu awood u leeyahay in uu tilmaamo muddo aan ka badneyn 3 bilood, haddii marxalad culus jiraan oo qasbay in la joojiyo arrimahaas.

Muddada dheereynta ijaarka, ijaarluhu wuxuu fulin doona wajiibaadka la mid ah haddii heshiiska ijaarka aan la baa’bin taas uu haddii fulin waayo laga noqon doono muddo dheereysiga.

**Qod. 7**

Xukunka ama amarka carifay in laga burburiyo heshiiska sababtoo ah deynka ijaka ee loogu tala galay hoy deegaan ah, waxaa loo ogolaan kara ijaarlaha muddo lagu bixiyo ijaarka lagu lahaa, qidmooyinka koray muddadas iyo kharaj maxkamadda.

Haddii ijaarluhu bixiyo muddada loo qabtay sida ku qoran faqrada sare ku xusan, xukunka iyo amarkuba waa qiimo beeli doonaan.

Muddadas kama badnaan karto hal bil.

**Qod. 8**

Amaradda ku xusan qodobada sare waxaa lagu dabaqi doona dacwooyinka socda intii ay ka hirgeleyso amar-sharcigaan.

## Cutubka 2aad

**Qod. 9**

Kirada hantida maguurtada ee loogu tala galay hoy deegaan ah ama isticmaal ka duwan lama kordhin karo, haddii ijaarle kale uu beddelo iyadoo aysan marka hore Guddiga ansixin sida uu qoray qod. 10.

Heshiis kasta ee tan ka soo horjeeda waa mid aan wax ku ool ahayn.

**Qod. 10**

Toban beri gudahooda laga bilaabo maalinta amar-sharcigaani hirgalo, waxaa laga dhisi doona Muqdisho, Guddi oo dalka gudahiisa u qaabil saanan doono suggidda iyo dib u habeynta kirooyinka oo ka koobaan doonta:

— Garsoorha Somaliya oo Guddomin doona;

— Laba injineer ee Xafiiska OO.PP;
— Laba muwaadin Talyaani ah oo ay soo magacawdo Xafiiska Ganacsia, mid meteli doona ijaarlaha iyo mid metela hantileha.

Haddii loo bahdo taladooda, Guddomiyuhu wuxuu u yeeri doona dad aan ahayn muwadinin aan Talyaani ahay.

Guddiga waxaa taakuleyn doona xoghayn oo Garsooraha Somaliya soo magacaabo kana mid ah shaqaalaha xoghaynta.

**Qod. 11**

Si loo qiimeyo in la badiyo ama la yareeyo kirada ku haboon Guddigu wuxuu ka baaran degi doona nooc hantida ma guurtada ah, goobta ay ku taalo, isticmaalka loogu tala gala, iyo guud ahaan xaladeed.

**Qod. 12**

Guddiga ku xusan qodobka 10 wuxuu leeyahay awoodda:

a) In uu carifo kirada ku haboon ee heshiisyada kirada aan weli la dhameestirin kadib codsiga laba dhinac;
b) In uu dib u habeeyn lagu suubiyo codsi labada dhinac ka yimid qiimaha heshiiska kirada socda ama la yareeyo.

**Qod. 13**

Guddigu wuxuu kadib markii laga reebo qababka aan muhim u ahayn in uu dejiyo qaabkii loo maareyn laha qaadista dacwada.

Guddigu wuxuu u carifii doona muddada loogaga baahan yahay labada dhinac in ay soo gudbiyeen macluumaadkooda iyo jawaabahooda. Waxaa la ogol yahay in labada dhinac ay si toos ah uga qeyb kale dacwada.

Haddii loo bahdo in si khibrad leh loo baaro dacwada, wuxuu Guddigu diri doona khabiro si loo soo baaro goobaha.

Go’aanka Guddiu waa kama dambeys.

**Cutubka 3aad**

Amarada ay Wadaagan Madaxyada Hore

**Qod. 14**

Amar-sharcigaani lagu dabaqi karo hantida maguurtada ah ee demaniale, kuwa laga leeyahay Hey’adda Qaranka ee guriyeenta shaqaalaha dowladda (INCIS) iyo kuwa deegaanka.

Waxaa la baa’biyey amaraddi ka horeeyey amar-sharcigaa oo ka soo horjeeda.

**Qod. 15**

Amar-sharcigaan wuxuu hirgeli doona markii lagu soo faafiyo Faafinta Rasmiga ee AFIS.

Muqdisho, 9 Juun 1950.

Maamulaha Guud

**Fornari**